



Nala soo hadal! Soo wac adeegga telefoonkeena Soomaali cusub ee wararka Buundada Galbeedka Seattle

Sawirka waxa qaaday Patricia Zavala on Unsplash

Ma ku hadashaa af Soomaali? Maanta na soo wac si wax badan uga ogaato Buundada Galbeedka Seattle iyo noogu sheegto sida fakarkaagu yahay. Leenka telefoonka waxa uu ku diyaar yahay 206-400-7511.

Si aad u isticmaasho adeegga telefoonka, raac tallaabooyinkani:

1) Wac 206-400-7511

2) Dhageyso liiska ka dibna riix 8 si aad ugu sii socoto af Soomaali.

3) Sug fariimaha inaad dhageysato, ka dibna noo sheeg magacaaga iyo telefoonkaaga, iyo su'aal ama hadal kasta ku saabsan Buundada Galbeedka Seattle. Waxad sidoo kale noo sheegi kartaa maalinta kugu fiican iyo waqtiga aan dib kuu soo wici karno si aan u wada hadli karno.

4) Qof ku hadla oo ku hadla af Soomaali ayaa dib kuu soo wici doona si uu kaala hadlo buundada. Waxanu rajeyneynaa inaan kula hadalno!

Adeegga telefoonkaan cusub wuxuu la macne yahay inaan isku xiri karno xittaa dad badan waxyaabaha ku saabsan Buundada Galbeedka Seattle, oo ay ku jirto dadka ku hadla luqadaha kale oon Ingiriiska aheyn ee ku nool Galbeedka Seattle, South Park, Georgetown, iyo xaafadaha kale.

Af Ingiriiska waxa dheer, waxan dadka kula hadleynaa arrimaha ku saabsan buundada Isbaanish, Shiinees, Fiyetnaamiis, Khamer, Oromo, Soomaali, iyo Kuuriyaan. Waxan dooneynaa inaan hubino in luqad aaney noqon darbi hor taagan helidda wararka muhiimka ah ee mashruuca. Waxan rajeyneynaa inaan idin siinno jawaabo waqtiyeysan oo la xiriira telefoonadii na soo wacay, taasi oo mataleysa mid ka mida mudnaanta aan siineyno, qiimeynta, iyo dabaaldega magaaladeena shidan iyo bulshadeena isku dhafka ah.

Waxan soo saarnay adeegga telefoonkani ka dib markii aanu la hadalnay xubnaha bulshada oo noo sheegay iney mararka qaar jecel yihiin iney si toos ah ula hadlaan qof, halkii ay ka akhrin lahaayeen iimeel ama warqad falayer ah. Si loo taageero ujeedkaan, waxan la bahownay tarjubaannada

magaalada ee aqoonta leh si loo horumariyo, loo tarjumo, iyo loo duubo farriimaha adeegga telefoonka aad maqli doonto

Dadkaasi xirfadleyaasha ah laftirkooda waxey ka tirsan yihiin xubnaha bulshada iyo dad asal ugu hadla luqadaha la soo xushay. Aqoontooda iyo khibraddooda waxey nagu caawineysaa abuurista ilo wareedyo oo loola dan leeyahay iney muuqato, mid dhaqanka ku habboon ah, asal ah, iyo soo dhoweyneysa dhammaan soo wacayaasha raadinaya warar ku saabsan Buundada Galbeedka Seattle, iyadoon loo eegin luqadda ay ku hadlaan.

Mar kale, fadlan ka soo wac Buundada Galbeedka Seattle khadka codka 206-400-7511. Fadlan la wadaag wararkan saaxiibadaada, familkaaga, saaxiibada shaqadaada, dadka kula cibaadeysta, iyo dariskaaga oo laga yaabo iney daneynayaan iney nagula hadlaan af Soomaali.

Waxanu rajeyneynaa inaan la xiriirno xubno badano oo bulshada ah ee ku nool Seattle oo ku hadla luqad aan aheyn Ingiriis, iyo hore ugu wadno hadafkeena ee lagu hubinayo in cod kasta la maqlo iyo war kasta cad yahay iyo qof kasta. Waxanu sii wadi donnaa inaan raadino waddooyin lagu horumarinayo laguna ballaarinayo adeeggan mustaqbalka.

Waad mahadsan tahay. Waa saaxiibadaada kuu jooga Waaxda Gaadiidka Seattle.



Sawirka waxa qaaday Akshar Dave on Unsplash